

DIB U HORMARINTA LAKE CITY COMMUNITY CENTER

Ujeedada Mashruuca

Lake City Community Center waxay ahayd qayb muhiim ah oo ka mid ah taariikhda xaafada ee Lake City, iyada oo ah xudunta hawlaha bulshada iyo isu keenida dadka da'da iyo dhaqamada kala duwan leh. Sanadkii 2023, dab ayaa baabi'iyay qayb weyn oo kamid ah dhismaha, waxaana la dumiyay xaruntii bulshada.

Sanadkii 2024, Seattle Parks and Recreation, oo ay iskaashanayaan Department of Neighborhoods, waxay sameeyeen qiimayn baahiyaha dhismaha si ay si fiican u fahmaan mudnaanta bulshada ee xarunta cusub. Sanadka 2025, magaaladu waxay dooratay Mercy Housing si ay u hogaamiso dib u dhiska, kaas oo ka koobnaan doona in ka badan 94 guri oo kiro ah oo la awoodi karo qiimo ahaan oo dabaqyada sare ah iyo xarun bulsho oo cusub oo heer wado ah. Naqshaddan hal-abuurka leh ayaa noqon doonta midii ugu horaysay ee nooceeda ah ee City of Seattle iyadoo la isku daray guryo la awoodi karo qiimo ahaan, adeegyada muhiimka ah, iyo goobaha bulshada la wadaago si loo abuuro goob soo dhaweyn leh oo ay degenayaashu ku noolaan karaan, isugu imaan karaan, oo ku hormari karaan. Seattle Parks and Recreation, oo ay weheliyaan Office of Housing iyo Department of Neighborhoods, waxay sii wadi doonaan ururinta ra'yiga bulshada iyada oo loo marayo shirarka dadweynaha si loo hubiyo in xarunta cusub ee bulshada ay buuxiso baahiyaha hadda iyo mustaqbalka ee bulshada Lake City.

DHISMAHA WAXAA LA FILAYAA INUU BILAABMO XAGAAGA 2026.

Jadwalka Mashruuca

Qorsheynta iyo Naqshada: 2024-2026 Dhismaha: 2027-2028 Dhamaystirka: 2028

Wixii Macluumaadka Mashruuca ah

@ Asmita.Poudel@seattle.gov ☎ 206-549-0827

🖨 seattle.gov/parks/about-us/projects/lake-city-community-center-redevelopment



Seattle
Parks & Recreation



繁體中文



Español



Tiếng Việt



Soomaali



አማርኛ



한국어



Tagalog

